

**France iyo Ciidda 15 Guurada Somaliland oo ka dhacaysa aqalka  
SENETKA ee PARIS  
18 May 2006**



Xaflad casho sharaf ah oo ay soo qaban qaabisay SOMALILAND HERITAGE oo la kaashatay Ururuka Somaliland ee dalka Fraansiiska ayaa ka dhacaysa habeenka khamiista ee bisha May tahay 18ka xarunta Senetka ee dalka Fransiiska.

Xafladan waxa si aad u hufan u soo qabanqaabisay Maryan Ibrahim Cabdi oo Madax ka ah Somaliland Heritage.

Waxa la filayaa in xafladdan ay ka soo qaybgalaan siyaasiin, ganacsato iyo suxufiyeen ku caan ah dalka Fransiiska. Waxa kale oo la filayaa inay ka soo qaybgalaan dad badan oo reer Somaliland ah oo ay ka mid yihiin Dr. Axmed Xuseen Cisse, Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Kulmiye, Cabdirahman Yaasin, Madax Ururuka Somaliland ee dalkan Fransiiska, Mohamoud Abdi Da'ar, Wakillka Somaliland ee Belgium iyo marti sharaf kale.

Sidoo kale Somaliland Heritage waxay dhawaan qaban doontaa Aqalka Wakiilada, French National Assembly, bandhig taariikhda soo jireenka ah ee Somaliland .

Wixii war ah ee ka soo biira xafladan qiimaha u yeelan doonta Somaliland waanu idinla soo socodsiiin.

Contact Maryan Ibrahim Cabdi  
SOMALILAND HERITAGE  
00 33 6 19 33 88 67  
mia@somalilandheritage.org